



## Hagaha Macluumaadka Xaaladaha Degdegga ah ee LOOGU TALAGALAY QOYSASKA

### Waa maxay jawaabaha laga bixiyo Noocyada kala duwan ee Xaaladaha Degdega ah ee Dugsiga?



#### KEYNDAAB SUGAN (HORE LOOGU WICI JIREY XIRITAAN/ XAYIRAAD)

**Xayndaab sugan** ayaa la meel mariyaa marka ay jirto walaac xagga badbaadada laga qabo taas oo aan khatar degdeg ah ku ahayn dugsiga. Tusaale ahaan, booliiska ayaa laga yaabaa inay baabuur ku dhex eryayaan xaafadda agagaarka dugsiga markaas in xayndaabka dugsiga la sugo ayaa ka hortagaya in qof uu soo galo ama ka baxo dhismaha.



#### XIRITAANKA/XAYIRAADDA ISKUULKA

**Xiritaanka/xayiraadda** waxaa la dhaqan geliyaa marka ay jirto walaac xagga badbaadada ah oo ka jira dugsiga. Tusaale ahaan, waxaa laga yaabaa in booliisku uu qof laga shakisan yahay ka dhex raadinayo dugsiga. Haddii ay dhacdo xiritaan/xayiraad, xasuusnow, "Xiritaan, Laydhka, Dhuumasho."



#### GABAAD RAADSASHO

**Gabaad-raadsasho** waa marka ardayda iyo shaqaalaha ay gabaad ku galaan meel sugan oo dugsiga ka mid ah, sida fasalka ama marinka. Tani waxay dhacdaa marka ay jirto khatar, sida duufaan ama digniin cimilo daran ah.



#### HAKINTA DUGSIGA

**Hakinta** waa marka ardaydu ay tahay inay ku sugnaadaan fasaladooda arrin la xiriirta badbaadada awgeed. Tusaale ahaan, dagaal ka dhacay marinka ayaa u baahan kara in ardayda laga ilaaliyo marinada inay soo maraan ilaa inta laga xaliyo dagaalka.



#### DAADGUREYN

**Daadgureynta** waa marka ardayda loo diro meel ka baxsan dhismaha dugsiga si looga hortago waxyeello ama dhaawac ka dhasha xaalad khatar ah oo ka jirta gudaha dugsiga, sida dab kacay.

#### WAXYAABAHA LA SAMEEYO IYO WAXYAABAHA AAN LA SAMAYN XILLIYADA XAALADAHHA DEGDEGGA AH IYO XAALADAHHA KHATARTA AH:

**HUBI** iimaylkaga iyo fariimaha qoraalka ah. DPS waxay ka faa'ideysataa SchoolMessenger xilliyda xaaladaha degdega ah.

**SUG** isgaadhsiinta wakhtiyada imaatinka iyo sii daynta haddii dhibaato ama xaalad degdeg ahi ay ku soo beeganto wakhtiga bilowga ama dhamaadka dugsiga.

**HA** imaan dugsiga ilmahaaga marka laga reebo haddii lagu ogeysiyo inaad sidaas samayso. Imaanshahaaga waxay abuuri kartaa cariiri xagga baabuurta ah waxayna jidka ka xiri kartaa shaqaalaha gurmada.

**HA** wicin ilmahaaga ama dugsiga ilmahaaga. Wicitaanada badan waxay carqaladayn karaan nidaamka isgaarsiinta taleefanka waxayna carqaladayn karaan isgaarsiinta xaaladaha degdega ah.



## Hagaha Macluumaadka Xaaladaha Degdegga ah ee LOOGU TALAGALAY QOYSASKA



### Diyaargarow

- Booqo Barta Waalidiinta ([myportal.dpsk12.org](http://myportal.dpsk12.org)) si aad u xaqiijiso inaad ka diiwaangashan tahay helitaanka ogaysiisyada xaaladaha degdegga ah iyo in macluumaadka xiriirka xaaladaha degdegga ah ee ilmahaaga uu yahay mid cusbooneysiisan.
- Sidoo kale gudaha Barta Waalidiinta, fadlan xaqiiji masuulka koowaad ee ku jira diiwaanka ilmahaaga, maadaama uu masuulkaas uu yahay qofka kaliya ee ilmaha lagu wareejin karo haddii ay dhacdo xaalad degdeg ah oo u baahan in ilmaha laga soo kaxeeyo.
- Xaqiiji in dugsiga ilmahaagu haysto macluumaadka xiriirka xaaladaha degdegga ah oo cusbooneysiisan.
- Kala hadal carruurtaada habraacyada loo isticmaalo xaaladaha degdegga ah ee ka jira dugsiga si ay u ogaadaan waxa laga filayo.
- La xiriir hogaamiyaha dugsigaaga si aad u ogaato sida dugsiga uu dhigto ilmahaaga ay waalidiinta ula xiriiraan xilliyada xaaladaha degdegga ah iyo habraacyada xaaladaha degdegga ah ee gaarka u ah dugsiga ee dhaqan gashan.



### In Carruurta Lagala Hadlo Rabshadaha: Talooyin ku socda Waalidiinta iyo Macalimiinta

Ficillada aadka u sarreeya ee rabshadaha ah, gaar ahaan dugsiyada ka dhaca, waxay jahawareerin karaan oo ay cabsi gelin karaan carruurta kuwaas oo laga yaabo inay dareemaan khatar ama inay ka welwelaan in saaxiibadood ama dadka ay jecel yihiin ay halis ku jiraan. Waxay raadin doonaan dadka waaweyn si ay uga helaan macluumaad iyo hagitaan ku aadan sida looga falceliyo xaaladahaas. Waalidiinta iyo shaqaalaha dugsiga waxay ka caawin karaan carruurta inay dareemaan badbaado iyagoo ku hagaya dareen caadi ah isla markaana kala hadlaya cabsidooda.

1. U xaqiiji carruurta inay badqabaan. Ku adkeey in dugsiyadu ammaan yihiin. Xaqiiji dareenkooda. U sharax in dhammaan dareenada kala duwan ay caadi yihiin marka ay masiibo dhacdo. U oggolow carruurta inay ka hadlaan dareenkooda, ka caawi inay ra'yi ka dhigaan, oo ka caawi inay si habboon u muujiyaan dareennadan.

2. Waqti u raadi oo aad kula hadasho. Su'aalhoodu hakuu noqdaan waxa kugu hagaya inta macluumaad ee aad siinayso. U samir; carruurta iyo dhallinyaradu si sahal ah ugama hadlaan dareenkooda.

U fiirso tilmaamo kuu muujin kara inay rabaan inay ku hadlaan, tusaale ahaan inay ku dul wareegaan hareerahaaga adigoo qabanaya hawsha dhaqida suxuunta ama shaqada dayrka. Carruurta qaarkood waxay door bidaan wax qoris, muusig, ama inay sameeyaan mashruuc farshaxan si ay xaalad uga baxsadaan. Carruurta yaryari waxa laga yaabaa inay u baahdaan waxqabadyo la taaban karo (sida sawir-gacmeedka, fiirfiirinta buugaagta sawirka, ama ciyaaro mala-awaal ah) si ay uga caawiyaan inay aqoonsadaan oo ay muujiyaan dareenkooda.

*Waxaa laga soo xigtay xaashida tilmaanta Ururka Qaranka ee Cilmi-nafsiga Dugsiga (NASP). Liiska talooyinka dhamaystiran ka eeg [safety.dpsk12.org](http://safety.dpsk12.org)*